Somali

Ombudsman
PUBLIC SERVICES OMBUDSMAN FOR WALES

Miyaad rabtaa inaad cabasho ka gudbiso xafiis dawladeed?

- Adiga iyo Dabagalha Dacwooyinka

Aniga iyo kooxdayda

Magacaygu waa Peter Tyndall oo ah Dabagalha Dacwooyinka Adeegga Bulshada ee Wales waxaan awood sharci u leeyahay in aan dhowro cabashooyinka ku saabsan adeegga dadwaynaha ee Wales. Waan ka madax banaanahay dhammaan hay'adaha dowlada.

Waxa ila shaqeeya koox dad ah oo iga caawiya inaan ka baaraan-dago oo aan baadho dhammaan cawabshooyinka oo dhan. Adeegga aanu bixinaa waa mid dhexdhexaada oo bilaash ah.

Waxaanu qabanaa

Waxaanu eegnaa cabashoohinka sheegaya in si aan mudnayn la idiinla dhaqmay ama ay idiin fidiyeen adeeg xun oo ka yimi qayb xun oo ka mid ah waaxda adeeggaa bixinaysa. Waanu eegi karaa dhamaan cabashooyinka laga keeno bandanka xafiisyada dawlada ee Wales ee ay ka mid yihiin

- dawladaha hoose (oo ay ku jiraan kawnsalada bulshadu)
- maamulada caafimaadka iyo amaanooyinka NHS
- Golaha Dawlada Welsh (Welsh Assembly Government) iyo dhamaan waaxaha ay masuulka ka yihiin
- ururada guriyaynta.

Taa macneheedu waa inaanu siino tix galin dhamaan cabashooyinka ka yimaada meelo badan oo ka mid ah adeeggyada la bixiyo sida:

- cisbitaalada iyo adeegyada GP-yada
- kawnsalka iyo ururada guriyaynta
- qorshaynta
- daryeelka bulshada.

Waxa kale oo aan eegnaa cabashoohinka ay xildhibaanadu (oo ay ku jiraan xildhibaanada bulshadu) ku xad gudbeen xeer hoosaadkoodii hab maamulka. Waxa jirta tusmo macluumaad ah oo gooniya oo aad ka heli karto waano iyo wixii aad yeeli lahayd haddii aad rabto inaad samayso cabasho noocaasoo kale.

Waxaad u baahantahay inaad ogaato

Mararka qaarkood waxaanu helanaa cabashooyin aanaan eegi karin. Dadku mararka qaarkood way ka xumaadaan marka aanu sidaa u sheegno. Si aad uga badbaado inaanu ku niyad-jabino, way fiicnaan lahayd in aad hore uga fikirto suurto galnimada in aanu cabashadaada eegi karno iyo in kale. Khaas ahaan, fadlan waydii naftaada su'aalahan soo socda:

- **Miyaan hore cabasho ugu gudbiyay waaxda dawlada lafteeda?**

Waxaanu badanaa kaa filaynaa inaad hore cabasho ugu gudbisay waaxda dawlada oo aad siisay fursad ay kaga soo jawaabaan cabashadaada. Haba ahaatee, waanu samayn tixgalin haddii aanu u argon in cabashadaadu ay tahay mid degdeg ah, tusaale ahaan, haddii nabadgalyadaadu ay khartar ku jirto.

Haddii aad gudbisay cabasho oo aad filayso in waaxda dawladu ay jawaabta la raagayaan (12 asbuuc waxaanu u aragnaa waqti macquula inay ku siiyaan jawaab kama danbaysa ah) waad noo soo gudbin kartaa cabasho. Waxa kale oo aad cabasho noo soo gudbin kartaa haddii aadan ku qanacsanayn jawaabta waaxda.

Haddii aadan hubin sida looga cawdo waaxaha dawlada, waxaad ka soo waci kartaa Kooxdayada Talo-kabixinta Cabashooyinka (Complaint Advice Team) **0845 601 0987**, kuwaasoo ku caawin doona.

- **Miyuu yahay xafiiska Dabagalha Dacwooyinka meesha ugu habboon ee aan gayn karo cabashadayda?**

Tusmadan waxaan ku qeexay waaxyaha aad cabasho ka gudbin karto, laakiin haddii aad gali kartid internet, waxaa jira liis dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku jira shabakadayad:
www.ombudsman-wales.org.uk

Waxa kale oo u baahan inaad ka feejignaato inaad ogaato inaanaan cabashadaada eegi karin haddii aad xaq u leedahay inaad qaadato racfaan ama aad cabashadaada maxkamada gayn kartid, ilaa ay jirto xaalad khaas ah oo macquul ka dhigayn inaad samayso sidaa.

- **Miyuu arrinku yahay mid uu sharcigu u ogolaanayo Dabagalha Dacwooyinka inuu eego?**

  Tusaale ahaan:

> waad diidi kartaa go'aanka ay gaadheen waaxda dawladu laakiin, haddii ay waaxdu ku saxsantahay go'aankeeda oo ay si fiican uga baaraan-dageen, markaa ma eegi karo cabashadaada.

> in kasta oo aanu eegi karo cabashooyinka la xidhiidha shaqaalaynta iyo habka la maray si shaqo laguu qoray, ma eegi karo arrimaha kale ee la xidhiidha arrimaha shaqaalaha sida mushaharada iyo anshix-dhowrista.

> wixii la xidhiidha waxbarashada, ma eegi karo arrimha la xidhiidha, wax barista, manhajka, shuruucda, anshaxmarinta ama maamulka dugsiyada iyo jaamacadaha.

> ma eegi karo oo kale heerka kirada iyo kharashka laga qaado adeegyada oo ay jaangooyeen ururada guriyayntu.

- **Miyaan cabashadayda ku soo gudbiyay waqti macquul ah?**

Way adakaan kartaa in la eego arrimo dhacay waqti hore. Sidaa darteed waxaanu kaa filaynaa inaad ku soo gudbiso cabashadaada 12 bilood gudohood laga bilaabo markii aad ogaatay in ay jirto dhibaato. Haba ahaatee, haddii uu waqti kaaga lumay adigoo si toos ah ugu cabanaya waaxdii aad ka cabanaysay, waanu tixgalin doonaa taa.

Sidii aad ugu caban lahayd Dabagalha Dacwooyinka – adigoo la xidhiidhaya Kooxdayada Talo-kabixinta Cabashooyinka

Haddii aadan hubin inay tahay inaad cabashada u gudbiso Dabagalha Dacwooyinka iyo in kale, ka wac Kooxdayada Talo-kabixinta Cabashooyinka 0845 601 0987 si aad ugala xaajooto arrinka. Xitaa haddii aad hubto in cabashadaadu ay tahay kuwa ay eegi karaan Dabagalha Dacwooyinka, had iyo goor way iska fiicanatahay inaad wacdo Kooxdayada Talo-bixinta si aad ugala xaajooto dhibaatada, waxaanu qabano iyo sida aanu u shaqayno.

Haddii ay cabashadaadu ku saabsantahay urur aanan eegi karain cabashada ka dhanka ah, waxaanu isku dayi doonaa in ay suurto gal tahay inaad u caban karto qolo kale oo eegta cabashooyinka, haddii ay taasi suurto gal noqoto, waxaanu qoladaa u diraynaa faahfaahinta cabashadaada.

Haddii ay cabashadaadu tahay mid ka mid ah kuwa aanu rumaysanahay inay qasab tahay inaanu eegno, markaa kadib waxaanu u baahanahay inaad buuxiso foomka cabashada. Kaasi waxa u kaaga baahan doonaa inaad ku buuxiso macluumaad shakhsi ah, aad qeexdo waxa cabashadu ay tahay iyo waxa aad waaxda dawlada ka rabto inay hagaajiyaan. Waxa laga yaabaa inaanu kuu buuxino foomka cabashada marka aad na soo wacdo.

Waxaad soo booqan kartaa shabakadayada si aad u soo gudbiso cabashadaada si toos ah cinwaankan: www.ombudsman-wales.org.uk.

Waxaanu samaynayno marka aanu helo cabashadaada

Marka aanu cabashadaada si qoto dheer u eegno kadib haddii aanu go'aansano inaanaan arinka halkaa ka sii wadi doonin, waanu kuu sharxi doonaa sababta.

Haddii ay cabashadaadu tahay mid aanu wax ka qaban karno oo aanu rumaysanahay inay jirto gabood fal ka yimi waax dawladeed, waanu eegi doonaa haddii ay suurto gal tahay in arrinka loo dhameeyo si aan rasmi ahayn.

Haddii aanaan cabashadaada ku dhamayn karayn si aan rasmi ahayn, khaas ahaan haddii ay u muuqato inay jireen gaboodfalyo khatar ah oo ay waaxdaas dawladu samaysay, waxaanu bilaabi doonaa baadhitaan rasmi ah. Si aanu taas u samayno waa inaanu dhagaysanaa labada dhinacba sheekadooda – taasi waa dhinacaaga iyo ta waaxda dawlada. Haddii ay cabashadadu khusayso arrin dabeecad khaas ah leh, waxaanu codsan doonaa talo khabiir dhexdhexaada oo naga caawiya inaanu arrinka go'aan ka gaadhno. Marka aanu soo ururino dhamaan xogaha oo dhan ee nala hor keenay oo aanu ka fiirsanay, waanu miisaami xaqiiqada waxaananu gaadhi go'aan wax ku ool ah.

laga yaabaa in go'aankaygu uu noqdo mid qeexaya in waaxda dawladu ay si cadaalad ah kuula dhaqantay ama inaan wax dhibaato ahi kaasoo gaadhin xaalad khaas ah. Haddii uu arrinku sidaa noqdo, waanu kuu sheegi doonaa sababta aanu go'aankaa u qaadanay.

Haddii aanu go'aansano in qaladku ka yimi waaxda dawlada oo aad u dhibaatootay sababtooda, waxaanu samayn doonaa qaraaro qeexaya waxa ay waaxda dawladu samayso si ay arrimaha u saxdo.

Doorkaygu ma aha inaanu u soo dhicino magdhow dadka. Ujeedadayadu waa inaanu ugu horaynba isku dayno inaanu ku dhigno meeshii ay ahayd inaad joogto haddii ay waaxda dawladu si xaq ah kuu la dhaqmi lahayd. Taasi waxay noqon kartaa in laguu dardaaro in lagu siiyo kharash badhi-gooyo ah ama laguu mag-dhabo khasaare kugu dhacay ama inaad hesho gunnooyin aad xaq u lahayd inaad heshid. Badanaaba, waxa la arkaa in aanu go'aan ku soo saaro in raali galini ay tahay mid ku filan arrinka. Meelihii daruuri ahna, waxaanu u sheegnaa waaxda dawlada inay qaadaan talaabo ay ku hore marinayaan nidaamkooda si aanu qof kale ugu dhibaatoon mar kale si la mid ah.

Mararka qaarkood waxay qaadataa dhowr bilood si loo dhamyastiro baadhitaan. Haba-ahaatee, inta dacwadu ay socoto dhexdeeda waxaanu kuula soo xidhiidhaynaa si joogto ah si aanu kuula socodsiino dhacdooyinka.

Waxaanu samayno haddii aad u baahantahay caawimo si aad cabasho u samaysid

Dabagalha Dacwooyinku waa inuu had iyo goor noqdaa dhexdhexaad marka uu eegayo cabasho. Sidaa darteed kuuma noqon karno af-hayeen marka aad noo soo cabanaysid. Haddii aad rabto inaad cabashadaada samaysid, xiliga aad waddo cabashada waxa jira urur samafal oo kaa caawin kara inaad samaysid cabashada. Tusaale ahaan, Kawnsalada Caafimaadka Bulshada (Community Health Councils), Golaha La taliya Muwaadiniinta (Citizens Advice Bureaux) iyo Gruiyaynta Cymru (Shelter Cymru). Haddii aadan garanayn ciddii ku caawin karta soo wac Kooxdayada Talo-kababixinta Cabashooyinka 0845 601 0987, kuwaasoo badiba kuu raadin doona hay'adii kuwaasoo kuu tilmaami doona urur kugu haboon.

Nala soo xidhiidh

Waanu ognahay in dadku ay ku kala duwan yihiin sida ay u rabaan inay noola soo xidhiidhaan. Tusaale ahaan, dadka qaar waxay jeclyihiin inay telefoon nagula soo xidhiidhaan intii ay qoraal noo soo diri lahaayeen dadka qaarna waxay macluumaadka ku rabaan hab kale sida cajalado ama CD. Dadkalena waxay door bidaan luqado kala duwan (tusmadani waxaad ku heli kartaa Carabi, Bengali, Cantonse, Fransiis, Hindi, Bolish, Somali). Noo sheeg waxa ay tahay baahidaadu anaguna waxaanu isku dayi doonaan inaanu sida ugu fiican u daboolo baahiyahaaga.

Sida naloola soo xidhiidho

Wac 0845 601 0987
E-mail ask@ombudsman-wales.org.uk
Soo booqo shabakada www.ombudsman-wales.org.uk

Noo soo qor: Public Services Ombudsman for Wales
1 Ffordd yr Hen Gae, Pencoed CF35 5LJ